



BOOSTU MA
QAADI DOONTO
HADDII AANAY
LAHAYN TIGIDH
AH DABAQADA
KOORAAD (FIRST
CLASS)

U SOO DIR: Secretary of State
60 Empire Drive
Suite 100
St. Paul, MN 55103

Si aad isu qortid cod-bixinta gobolka Minnesota, waa inaad ka soo baxdid dhamaan saddexda shuruudood ee soo socda:



1. Waa inaad tahay qof muwaadin u ah wadanka Maraykanka, iyo
2. Waa inaad daganayd Minnesota ugu yaraan 20 cisho ka hor maalinta doorashada, iyo
3. Waa inaad ugu yaraan jirtid 18 sannadood maalinta doorashada.

Fariimo la Siinayo Cod-bixiyaha

1. Buuxi sanduuqyada min 1 ilaa 15 ee ku yaalla Arjiga Diiwaangalinta Cod-bixiyaha Minnesota (Minnesota Voter Registration Application).
2. Lambarka teleefonku waa ikhtiyaar.
3. Saxeex oo taariikhda ku qor Arjiga Diiwaangalinta Cod-bixiyaha Minnesota.

War Guud

Wixii ah war dheeraad oo ku saabsan cod-bixinta, sida la isugu diiwaangaliyo cod-bixinta, sida loo helo meesha ay ku taallo rugtaada cod-bixintu, natiijooyinka doorashada gobolka, warka ololaha, ama qabashada doorashooyin, u tag rugta internetka ee Xoghayaha Gobolka Minnesota (Minnesota Secretary of State) oo ku taalla www.sos.state.mn.us.

MA tihid qof si sharci ah u qoran inuu cod-bixiyo ilaa arjigaaga uu ka shaqeeyo hubiyaha degmadaadu (county auditor). Waa inaad boosta ka heshid Kaadhka Warka Cod-bixiyaha Xaafadda (Voter Precinct Information Card). Haddii aanad helin Kaadhka Cod-bixiyaha Xaafadda inta aan la gaadhin doorashada soo socota, ama haddii aad qabtid su'aale kale, fadlan la xidhiidh hubiyaha degmadaada.

La xidhiidh hubiyaha degmadaada haddii aad u baahan tahay war ku saabsan diiwaangalinta ama gargaarka cod-bixinta ee loogu talagalay dadka waayeelka ah, dadka leh naafo, ama dadka kujira goobaha daryeelka caafimaadka.

Warka Taariikhda Ugu Dambaysa

Waxa wakhti kasta kuu suurogal ah inaad hore isu sii qortid si aad cod u bixisid ugu yaraan 20 cisho ka hor doorashada. Haddii aanay suurogal kuu ahayn inaad isu sii qortid cod-bixinta 20 cisho ka hor doorashada, waa inaad iska diiwaangalidisid goobtaada cod-bixinta Maalinta Doorashada si aad cod u bixisid.

Waxa la heli karaa Arjiyo Diiwaangalin Cod-bixiye Minnesota oo far waaweyn ah marka laga codsado Hubiyaha Degmadaada ama Xafiiska Xoghayaha Gobolka.